

Adeegga Imtixaanaadka Waxbarashada (Educational Testing Service, ETS)

[Cinwaanka Boostada ee Soo-celinta]

[Magaca Koowaad] [Magaca Qoyska], ama Waalidka ama Masuulka [Magaca Koowaad] [Magaca Qoyska]
[Cinwaanka]
[Magaalada, Gobolka, Baaqa Boostada]
[Taariikhda]

MAWDUUCA: OGEYSIIS KU SAABSAN XADGUDUB XOGEEED

Ku socota [Magaca Koowaad] [Magaca Qoyska], ama Waalidka ama Masuulka [Magaca Koowaad]
[Magaca Qoyska]

Adeegga Imtixaanaadka Waxbarashada (ETS), oo ay hagayso Waaxda Waxbarashada California (California Department of Education, CDE), ayaa ardayda iyo qoysaska California ku wargelinaya dhacdo amni oo ku lug leh in dad aan loo ogoleyn ay heleen oo nuqul ka sameysteen xogta ardayga iyadoo la adeegsanayo mareegta hab-maamuuska sugan ee wareejinta faylka/xogta ee ETS (secure file transfer protocol, SFTP), tallaabooyinka la qaadayo si loo ilaaliyo macluumaadka shakhsiyeed ee ardayda, iyo agabyada iyo taageerada la heli karo. Hay'adaha ku habboon ee sharci-fulinta ayaa la ogeysiiyay, balse baaritaannadoodu dib ma uusa u dhigin ogeysiiskan.

ETS waa hay'ad qiimeyn/imtixaan-qaadis oo aan faa'iido doon ahayn, taas oo heshiis kula jirta Gobolka California si ay u bixiso imtixaannada ay sharciyada gobolka iyo kuwa federaalku farayaan ee loogu talagalay dhammaan ardayda dhigata dugsiyada dadweynaha/dowladda ee California. Adeegga ETS wuxuu taageeraa barnaamijyada qiimaynta ee heerka gobol ee California, oo ay ku jiraan Qiimaynta Waxqabadka iyo Horumarka Ardayda ee California (California Assessment of Student Performance and Progress, CAASPP) iyo Qiimaynta Awoodda Luuqadda Ingiriisiga ee California (English Language Proficiency Assessments for California, ELPAC).

Sababta aan ogeysiiskan kuugu soo diraynaa waa in xog shakhsiyeed oo idinku saabsan adiga ama cunuga yar ku hoos yimaada la helay, nuqulna laga baxshay xiligii dhacdadan la xiriiirta amniga xogta.

Si gacan looga geysto ilaalinta ardayda haddeer iyo kuwii hore ee dhibaataadu saameysay, adeega ETS wuxuu bixinayaa adeegyo bilaash ah oo loogu talagalay ilaalinta aqoonsiga shakhsiyeed iyadoo la adeegsanayo Experian IdentityWorks, muddo 2 sano ah.

Maxaa dhacay?

Taariikhdu markay ahayd Sibteembar 25, 2026, adeega ETS wuxuu aqoonsaday hawl aan la oggoleyn oo ku lug leh mareegta SFTP ee loo isticmaalo in macluumaadka qiimaynta gobolka California lagula wadaago CDE.

Adeega ETS waxay joojiyeen akoonkii arrintu khusaysay, waxay hawada ka saareen mareegtii SFTP ee ay dhibaataadu saamaysay, waxayna bilaabeen baaritaan iyagoo kaashanaya khubaro dibadeed oo ku takhasusay amniga internetka. Baaritaanku wuxuu daah-furay in cid aan fasax haysan ay adeegsadeen xog gelitaan (login credentials) oo la jabsaday, xilliyo kala duwan intii u dhaxaysay 22-da Maajo, 2026 ilaa

Adeegga Imtixaanaadka Waxbarashada (Educational Testing Service, ETS)

18-ka Sibteembar, 2026, si ay u galaan mareegta SFTP oo ay nuqul ugala baxaan faylal ay ku jiraan xog ku saabsan ardayda gobolka California.

Waa Maxay Macluumaadka ku Lugta lahaa?

Macluumaad ku saabsan ardayda California—oo ay ku jiraan, balse aan ku koobnayn, dhammaan ardaydii diiwaangashanaa saddexdii sanad-dugsiyadeed ee la soo dhaafay—ayaa la helay, nuqulna laga sameeystay. Macluumaadka la helay oo nuqulka laga sameeystay waxaa ku jiray xogta dadeed ee ardayda, ka qaybgalka barnaamijka, iyo xogta qiimaynta ee ETS ay hayaan marka la eego barnaamijyada qiimaynta gobolka California.

Macluumaadka ardayga ee la helay ama nuqulka lagala baxay wuxuu u kala duwan yahay shakhsiyaadka kala duwan, laakiin waxaa ka mid noqon kara:

- Magaca ardayga, taariikhda dhalashada, cinwaanka deegaanka/guriga, dugsiya, degmada, iyo heerka fasalka;
- Aqoonsiga Ardayga ee Heerka Gobol (Statewide Student Identifier, SSID) iyo aqoonsiga ardayga ee heerka deegaan;
- Jinsiga, isirka ama qowmiyadda, luuqadda koowaad, qaranka asalka, iyo heerka barashada luuqadda Ingiriisiga;
- Naafanimada iyo heerka Qaybta 504 (Section 504), hababka gaarka ah ee imtixaanka, iyo nooca asaasiga ah ee naafanimada;
- Heerka u-qalmitaanka ee barnaamijyada soo socda: Title I, Qaybta A (Part A); Title I, Qaybta C (Part C); McKinney-Vento; iyo Ardayga Xiriirka la leh Ciidamada; iyo/ama
- Macluumaadka ku saabsan heerka aqoonta luuqadda Ingiriisiga iyo diiwaangelinta qiimeynta/imtixaanaadka, ka-qaybgalka, iyo natiijooyinka qiimaynta heerka gobol — marka ay khuseeyaan.

Xogta la helay ee nuqulka laga baxshay kuma jirin lambarrada Soshiyaal Sekiyuuritiga (Social Security), lambarrada shatiga darawalnimada, lambarrada baasaboorka, macluumaadka koontada maaliyadeed, macluumaadka kaararka deynta ama kaararka koontada caadiga ah ee bangiga, iyo erayada sireed ee koontada. Dhacdadu ma aysan ku lug lahayn xogta shakhsiyeed ee waalidka ama masuulka.

Waxa Aan Samaynayno.

Jawaabta ETS

Markii la ogaaday dhacdada, ETS waxay qaadeen tallaabooyin badan oo lagu xoojinayo amniga mareegta SFTP, oo ay ka mid yihiin in mareegta laga saaro khadka (offline) iyo in la dhiso mareeg SFTP ah oo gebi ahaanba cusub, taasi oo leh habab ammaan oo la xoojiyey. ETS waxay sii wadaan qiimeynta tallaabooyin ammaan oo dheeraad ah oo laga yaabo inay habboon yihiin.

Ka dib markii ay la shaqeeyeen hay'adaha sharci-fulinta iyo khubarada amniga internetka, ETS waxay qaadeen tallaabooyin lagu yareynayo khatarta suurtagalka ah ee ah in xogta ay noqoto mid dadweynaha

Adeegga Imtixaanaadka Waxbarashada (Educational Testing Service, ETS)

oo dhan ay heli karaan. Intaa waxaa dheer, ETS, ka dib kormeerida joogtada ah ee bogga internetka, weli ma aysan helin wax caddeyn ah oo muujinaya in macluumaadkaas loo shaaciyay dadweynaha.

Jawaabta Dawladda Gobolka

CDE iyo Guddiga Waxbarashada ee Gobolka (SBE) ayaa la shaqeynaya khubarada amniga xogta ee gobolka si ay u qiimeeyaan saameynta ay arrintani ku yeelanayso ardayda iyo qoysaska ku nool California, iyo si dadka ay saameyntu gaartay ay u helaan macluumaadka iyo taageerada ku habboon.

Xarunta Isku-dhafka Amniga Internetka ee California (California Cybersecurity Integration Center, Cal-CSIC) ayaa gacan ka geysanayso baaritaannada dhijitaalka ah iyo taageerada ka jawaabista dhacdooyinka. Waaxda Teknoolojiyadda ee California (California Department of Technology, CDT) iyo Xafiiska Adeegyada Gurmadka ah ee Guddoomiyaha California (Cal OES) ayaa sidoo kale taageeraya jawaabta gobolka ee dhinacyada farsamada, sharciga, iyo hawlgallada.

CDE iyo SBE ayaa sidoo kale dib u eegaya dhacdada, iyo sida ay ETS u hoggaansan yihiin shuruudaha khuseeya amniga xogta iyo waajibaadka qandaraaska.

Adeegyada Ilaalinta Aqoonsiga ee Bilaashka ah ee loo marayo Experian

Si gacan looga geysto ilaalinta ardayda haddeer iyo kuwii hore ee dhibaataadu saameysay, adeega ETS wuxuu bixinayaa adeegyo loogu talagalay ilaalinta aqoonsiga shakhsiyeed iyadoo la adeegsanayo Experian IdentityWorks, muddo 2 sano ah iyadoon lagaa qaadayn wax kharash ah.

Waxaa jira laba adeegyo oo loogu talagalay ilaalinta aqoonsiga: mid loogu talagalay ardayda aan qaangaarin/da'doodu ka yar tahay 18 sano, iyo mid loogu talagalay ardayda haddeer wax baranaya ama kuwii hore ee hadda qaangaarka ah.

Minor Plus - Loogu talagalay ardayda ay saamaynta soo gaartay ee da'doodu ka yar tahay 18 sano jir:

Waalid ama mas'uul sharci ah ayaa ardayga ka diiwaangelin kara adeegyada ilaalinta aqoonsiga ardayda yaryar ee la heli karo marka la gaaro ama ka hor waqtiga diiwaangelinta ee kama dambaysta ah ee Maarso 19, 2027. Carruurta gaara 18 jir hadda ilaa Maarso 19, 2029 waxay iska diiwaangelin karaan badeecada/adeega dadka waaweyn markay gaaraan 18 sano jir iyagoo adeegsanaya baadi-sooca/koodhka hawlgelinta adeega dadka waaweyn. **Wixii macluumaad ah ee ku saabsan sida caruurta aan qaangaarin loogu diiwaangeliyo adeegan, eeg Lifaafa ku lifaaqan Ogeysiiskan.**

Adult (Dadka waaweyn) - Loogu talagalay dadka ay saamayntu soo gaartay ee da'doodu tahay 18 sano jir ama ka weyn: Dadka waaweyn ee ay saamayntu soo gaartay waxay si toos ah isaga diiwaangelin karaan adeegyada Experian IdentityWorks ee la heli karo marka la gaaro ama ka hor taariikhda kama dambaysta ah ee diiwaangelinta ee ku beegan Maarso 19, 2027. **Wixii macluumaad ah ee ku saabsan sida dadka qaangaarka ah isaga diiwaangelin karaan adeegan, eeg Lifaafa ku lifaaqan Ogeysiiskan.**

Diiwaangelintu wax kharash ah kuguma fadhido, lamana codsan doono xogta kaarka deynta.

Waxa Aad Samayn Karto.

Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad tixgeliso inaad ardayda ay dhibaataadu saameysey ka diiwaangeliso adeegyada ilaalinta aqoonsiga oo aad ka feejignaato suurtagalnimada in si khaldan loo isticmaalo

Adeegga Imtixaanaadka Waxbarashada (Educational Testing Service, ETS)

macluumaadka shakhsiyeed ee ardayga. Ka digtoonow mareegaha ilaalinta aqoonsiga been-abuurka ah adigoo laba jeer hubinaya URL-yada ka hor intaadan bixin macluumaad.

Waa hab-dhaqan wanaagsan in mar walba laga digtoonaado iimayllada, farriimaha qoraalka ah, ama wicitaannada taleefanka ee aan la filayn ee ka hadlaya dugsiga ardayga, imtixaannada heer gobol, ama dhacdadan. Ha wadaagin macluumaad shakhsiyeed, erayada sireed, ama xog maaliyadeed markaad ka jawaabayso codsiyo aadan horay u dalban.

Ardayda ay saamayntu soo gaartay iyo qoysaskooda ayaa sidoo kale tixgelin kara inay dib u eegaan macluumaad dheeri ah oo ku saabsan xatooyada aqoonsiga iyo ilaalinta macluumaadka shakhsiyeed kaasi oo laga heli karo barta Qaybta Fulinta iyo Ilaalinta Asturnaanta ee Waaxda Caddaaladda ee California ee ah <https://oag.ca.gov/privacy>.

Wixii Macluumaad Dheeri ah.

CDE, 1430 N Street, Sacramento, CA 95814, waxay sameeyeen barta www.cde.ca.gov/ets oo laga heli kara macluumaad iyo warar cusub oo ku saabsan dhacdadan la xiriirta amniga xogta.. Bogga internetka waa la cusboonaysiin doonaa haddii macluumaad dheeraad ah la helo. Ogeysiiskan waxaa bogga internetka looga heli karaa luuqado badan.

ETS waxay si weyn u qadariyaan amniga xogta ardayda, waxayna si daacad ah uga xun yihiin in dhacdadan ay dhacday. Haddii aad su'aalo ka qabto dhacdadan, fadlan wac 833-931-8488, laga bilaabo Isniinta ilaa Jimcaha, saacadda 6:00 subaxnimo ilaa 6:00 galabnimo (waqtiga Pacific-ga), marka laga reebo maalmaha fasaxa ah ee waaweyn ee dalka Maraykanka. Haddii aad qabto dhibaato ah dhanka hadalka ama maqalka ah oo aad isticmaasho adeegga TTY, fadlan wac 711. Fadlan u diyaar garow inaad bixiso lambarkaaga diiwaangelinta/kaqaybgalka (engagement number): B174774 oo loogu talagalay ardayda ka yar 18 sano, ama B174775 oo loogu talagalay ardayda da'doodu tahay 18 sano jir ama ka weyn.

Niyad wanaagsan,

Adeegga Imtixaanaadka Waxbarashada

Esta notificación está disponible en español en el sitio web del Departamento de Educación de California en www.cde.ca.gov/ets.

本通知提供简体中文版·请访问加利福尼亚州教育部网站：www.cde.ca.gov/ets。

Phiên bản tiếng Việt của thông báo này có trên trang web của Bộ Giáo dục California tại www.cde.ca.gov/ets.

本通知設有繁體中文版，載於加州教育部網站：www.cde.ca.gov/ets。

Այս ծանուցումը հասանելի է հայերեն Կալիֆոռնիայի կրթության դեպարտամենտի կայքում՝ www.cde.ca.gov/ets հուղեով:

در دسترس است www.cde.ca.gov/ets این اطلاعیه به زبان فارسی در وبسایت اداره آموزش و پرورش کالیفرنیا به نشانی

이 안내문은 캘리포니아주 교육부 웹사이트(www.cde.ca.gov/ets)에서 한국어로 제공됩니다.

ਇਹ ਨੋਟਸ ਕੈਲੀਫੋਰਨੀਆ ਡਿਪਾਰਟਮੈਂਟ ਆਫ਼ ਐਜੂਕੇਸ਼ਨ ਦੀ ਵੈੱਬਸਾਈਟ www.cde.ca.gov/ets 'ਤੇ ਪੰਜਾਬੀ ਵਿੱਚ ਉਪਲਬਧ ਹੈ।

Это уведомление доступно на русском языке на веб-сайте Департамента образования Калифорнии по адресу www.cde.ca.gov/ets.

Daim ntawv ceeb toom no muaj ua lus Hmoob nyob rau ntawm California Lub Chaw Hauj Lwm Saib Xyuas Kev Kawm Ntaub Ntawv ntawm www.cde.ca.gov/ets.

www.cde.ca.gov/ets. הודעה זו זמינה בעברית באתר האינטרנט של משרד החינוך של קליפורניה בכתובת

Cet avis est disponible en français (France) sur le site Web du Département de l'Éducation de Californie à l'adresse www.cde.ca.gov/ets.

Ogeysiiskan waxaa looga heli karaa af-Soomaali bogga internetka ee Waaxda Waxbarashada California barta www.cde.ca.gov/ets.

ဤအသိပေးချက်ကို ကယ်လီဖိုးနီးယားပြည်နယ် ပညာရေးဌာန၏ ဝဘ်ဆိုက် www.cde.ca.gov/ets တွင် မြန်မာဘာသာဖြင့် ရရှိနိုင်ပါသည်။

សេចក្តីជូនដំណឹងនេះមានជាភាសាខ្មែរ នៅលើគេហទំព័ររបស់នាយកដ្ឋានអប់រំរដ្ឋកាលីហ្វ័រញ៉ា តាមរយៈ www.cde.ca.gov/ets/ ។

Bu bildirim, Kaliforniya Eğitim Departmanı'nın www.cde.ca.gov/ets adresindeki web sitesinde Türkçe olarak mevcuttur.

www.cde.ca.gov/ets ແມ່ນໜ້າຂໍສອບຖາມທີ່ຈະໃຫ້ທ່ານຮູ້ວ່າເປັນແຕ່ງຕັ້ງໃນລະດັບໃດ ທ່ານຈະໄດ້ຮັບການສອບຖາມກ່ຽວກັບການຄຸ້ມຄອງພືດຕົ້ນຕົ້ນ ແລະ ສິ່ງອື່ນໆ ທີ່ກ່ຽວຂ້ອງກັບການຄຸ້ມຄອງພືດຕົ້ນຕົ້ນ ໃນລະດັບນີ້.

Haddii aad aaminsan tahay in macluumaadka ilmaha da'da yar ee aad mas'uulka ka tahay si khaldan ama khiyaano ah loo isticmaalay dhacdadan awgeed, isla markaana aad doonayso inaad ka hadasho sida arrimahaas xal loogu heli karo, fadlan la xiriiir wakiil ka tirsan Experian. Haddii, ka dib markaad wakiilka kala hadasho xaaladdaada, la go'aamiyo in loo baahan yahay taageerada soo celinta aqoonsiga, markaa wakiil ka socda Soo-celinta Aqoonsiga ee Experian (Experian Identity Restoration) ayaa diyaar u

Adeegga Imtixaanaadka Waxbarashada (Educational Testing Service, ETS)

ah inuu kula shaqeeyo si uu u baaro oo uu u xalliyo dhacdo kasta oo khiyaano ah oo dhacday laga soo bilaabo taariikhda dhacdada (oo ay ku jiraan, markay habboon yihiin, inuu kaa caawiya inaad la xiriirto deyn bixiyeyaasha si aad uga doodo kharashyada oo aad u xirto akoonnada; inuu kaa caawiya inaad xayirto faylkaaga deynta ee saddexda xafiis ee deynta ee ugu waaweyn; iyo inuu kaa caawiya inaad la xiriirto hay'adaha dowladda si ay kaaga caawiyaan inaad aqoonsigaaga ku soo celiso xaaladdiisii saxda ahayd).

Fadlan ogow in adeegga soo-celinta aqoonsiga (Identity Restoration) uu kuu diyaar yahay muddo 24 bilood ah, laga bilaabo taariikhda warqaddan, mana u baahna wax tallaabo ah oo dhankaaga laga rabo xilligan. Shuruudaha iyo Xeerarka dalabkan waxay ku yaallaan www.ExperianIDWorks.com/restoration.

In kasta oo kaalmada dib u soo celinta aqoonsiga ay isla markiiba kuu diyaar tahay, waxaan sidoo kale kugu dhiirigelinaynaa inaad hawlgeliso aaladaha ogaanshaha khiyaanada ee laga heli karo Experian IdentityWorks kuwaasi oo ah xubinnimo 24-bilood ah oo bilaash ah. Alaabtani waxay ku siinaysaa awood heer sare ah oo lagu ogaado aqoonsiga laguna xaliyo kiisaska xatooyada aqoonsiga. Si aad u bilowdo la socodka macluumaadka shakhsiyeed ee ilmaha da'da yar ee kugu tiirsan, fadlan raac tallaabooyinka hoose:

- Xaqiiji inaad **is-diiwaangeliso ugu dambeyn** 19-ka Maarso, 2027 (Koodkaagu ma shaqeyn doono taariikhdan ka dib.)
- **Booqo** mareegta Experian IdentityWorks si aad isu diiwaangeliso:
<https://www.experianidworks.com/minorplus>
- Geli koodkaaga/baadi-soocaaga hawlgelinta: RSWMV3F3N
- Bixi macluumaadka ilmahaaga aan qaan-gaarin marka lagu weydiiyo

Haddii aad su'aalo ka qabto badeecadan/adeegan, haddii aad u baahan tahay caawimaad ku saabsan soo-celinta aqoonsigaaga (Identity Restoration) taasi oo ka dhalatay dhacdadan, ama haddii aad rabto hab kale oo aan ahayn inaad onlayn iskaga diiwaangeliso Experian IdentityWorks, fadlan la xiriir kooxda adeegga macaamiisha ee Experian adigoo adeegsanayo lambarka 833-931-8488 ugu dambeyn 19-ka Maarso, 2027. Diyaar u noqo inaad bixiso lambarka kaqaybgalka ee ah B174774, kaas oo caddayn u ah inaad xaq u leedahay adeegyada soo-celinta aqoonsiga (Identity Restoration) ee ay bixiso Experian.

FAAHFAAHIN DHEERAAD AH OO KU SAABSAN XUBINNIMADA ARDAYGAAGA EE 24-ta BILOOD AH EE EXPERIAN IDENTITYWORKS:

Looma baahna kaarka deynta marka iska diiwaangelinayo Experian IdentityWorks. Waxaad isla markiiba la xiriiri kartaa Experian haddii ay jiraan arrimo la xiriira khiyaano, waxaana kuu furnaan doona adeegyada soo socda marka aad iska diiwaangeliso Experian IdentityWorks:

- **Raadraaca Lambarka Soshiyaal Sekiyuuritiga:** Kormeerid lagu ogaanayo in carruurta yaryar ee qoyskaaga ku nool ee diiwaangashan ay leeyihiin warbixin deyn (credit report) oo ka socota Experian. Digniino ku saabsan dhammaan magacyada, naanaysyada, iyo cinwaannada lala xiriiriyo Lambarka Soshiyaal Sekiyuuritiga (SSN) ee ilmahaaga aan qaan-gaarin, kuwaas oo ka muuqda warbixinta deynta ee Experian.
- **Kormeerka Internetka:** Tiknoolajiyaddu waxay baartaa internetka, goobaha lagu sheekeysto, iyo madallada lagu wadaago farriimaha 24 saacadood maalintii, toddobada

Adeegga Imtixaanaadka Waxbarashada (Educational Testing Service, ETS)

maalmood ee toddobaadka, si ay u ogaato in xogtaada shakhsiyeed looga ganacsanayo ama lagu iibinayo "Dark Web"-ka.

- **Soo-celinta Aqoonsiga:** Khubarada ku takhasusay soo-celinta aqoonsiga ayaa diyaar u ah inay isla markiiba kaa caawiyaan wax ka qabashada falalka khiyaanada ah, ha ahaadaan kuwo la xiriira deynta ama kuwo aan la xiriirin deynta.
- **Experian IdentityWorks ExtendCARE™:** Waxaad helayaa isla heerka sare ee taageerada soo-celinta aqoonsiga, xitaa ka dib markii xubinnimadaada Experian IdentityWorks ay dhacdo.
- **Caymiska Xatooyada Aqoonsiga oo gaaraya 1 Milyan oo doolar**:** Wuxuu bixiyaa caymis daboolaya kharashyo gaar ah iyo wareejinta lacagaha elektaroonigga ah ee aan la oggolayn.

ARDAYDA DA'DOODU TAHAY 18 SANO JIR IYO KA WEYN - FAAHFAAHIN DHEERAAD AH OO KU SAABSAN XUBINNIMADA 24-TA BILOOD AH EE EXPERIAN IDENTITYWORKS:

Si aan gacan uga geysano ilaalinta aqoonsigaaga, waxaan bixinaynaa **xubinnimada** Experian IdentityWorksSM oo bilaash ah oo soconeyso 24 bilood. Alaabtani waxay ku siinaysaa awood heer sare ah oo lagu ogaado aqoonsiga laguna xaliyo kiisaska xatooyada aqoonsiga. Si aad u adeegsato xubinnimadaada oo aad u bilowdo la socodka macluumaadkaaga shakhsiyeed, fadlan raac tallaabooyinka hoose:

Adeegan wuxuu ku siinayaa kormeerida internetka iyo caymiska ka dhanka ah xatooyada aqoonsiga, kuwaas oo bilaash kuu ah marka aad is-diiwaangeliso.

- Xaqiiji inaad **is-diiwaangeliso ugu dambeyn: Maarso 19, 2029** (Koodkaagu ma shaqayn doono taariikhda kadib.)
- **Booqo** mareegta Experian IdentityWorks si aad isu diiwaangeliso:
<https://www.experianidworks.com/identity>
- Geli koodkaaga/baadi-soocaaga hawlgelinta: N8MDNZPJD

Haddii aad su'aalo ka qabto badeecada/adeega, haddii aad u baahan tahay caawimaad ku saabsan soo-celinta aqoonsiga, ama haddii aad rabto ikhtiyaar kale oo beddel u ah inaad onlayn iskaga diiwaangeliso Experian IdentityWorks, fadlan la xiriir kooxda adeegga macaamiisha ee Experian adigoo adeegsanayo lambarka 833-931-8488 ugu dambeyn 19-ka Maarso, 2027. Diyaar u noqo inaad bixiso lambarka kaqaybgalka ee ah B174775, kaas oo caddayn u ah inaad xaq u leedahay adeegyada soo-celinta aqoonsiga ee ay bixiso Experian.

FAAHFAAHIN DHEERAAD AH OO KU SAABSAN XUBINNIMADAADA 24-TA BILOOD AH EE EXPERIAN IDENTITYWORKS:

Looma baahna kaarka deynta marka iska diiwaangelinayo Experian IdentityWorks.

Waxaad **isla markiiba** la xiriiri kartaa Experian haddii ay jiraan arrimo la xiriira khiyaano, waxaana kuu furnaan doona adeegyada soo socda marka aad iska diiwaangeliso Experian IdentityWorks:

- **Kormeerka Internetka:** Tiknoolajiyaddu waxay baartaa internetka, goobaha lagu sheekeysto, iyo madallada lagu wadaago farriimaha 24 saacadood maalintii, toddobada maalmood ee

Adeegga Imtixaanaadka Waxbarashada (Educational Testing Service, ETS)

toddobaadka, si ay u ogaato in xogtaada shakhsiyeed looga ganacsanayo ama lagu iibinayo "Dark Web"-ka.

- **Soo-celinta Aqoonsiga:** Khubarada ku takhasusay soo-celinta aqoonsiga ayaa diyaar u ah inay isla markiiba kaa caawiyaan wax ka qabashada falalka khiyaanada ah, ha ahaadaan kuwo la xiriira deynta ama kuwo aan la xiriirin deynta.
- **Experian IdentityWorks ExtendCARE™:** Waxaad helayaa isla heerka sare ee taageerada soo-celinta aqoonsiga, xitaa ka dib markii xubinnimadaada Experian IdentityWorks ay dhacdo.
- **Caymiska Xatooyada Aqoonsiga oo gaaraya 1 Milyan oo doolar**:** Wuxuu bixiyaa caymis daboolaya kharashyo gaar ah iyo wareejinta lacagaha elektaroonigga ah ee aan la oggolayn.

** Caymiska ka dhanka ah xatooyada Aqoonsiga waxaa dammaanad-qaada oo bixiya shirkadda American Bankers Insurance Company of Florida, taasi oo ah shirkad ka tirsan Assurant. Fadlan tixraac siyaasadaha rasmiga ah si aad u ogaato shuruudaha, qawaaniinta, iyo waxyaabaha aan caymiska ku jirin. Caymiska ayaa laga yaabaa inaanu ka jirin dhammaan aagagga.

Haddii aad aaminsan tahay in macluumaadkaaga si khalidan ama khiyaano ah loo isticmaalay dhacdadan awgeed, isla markaana aad doonayso inaad ka hadasho sida arrimahaas xal loogu heli karo, fadlan la xiriir wakiil ka tirsan Experian adigoo adeegsanayo lambarka 833-931-8488. Haddii, ka dib markaad wakiilka kala hadasho xaaladdaada, la go'aamiyo in loo baahan yahay taageerada soo celinta aqoonsiga, markaa wakiil ka socda Soo-celinta Aqoonsiga ee Experian (Experian Identity Restoration) ayaa diyaar u ah inuu kula shaqeeyo si uu u baaro oo uu u xalliyo dhacdo kasta oo khiyaano ah oo dhacday (oo ay ku jiraan, markay habboon yihiin, inuu kaa caawiya inaad la xiriirto deyn bixiyeyaasha si aad uga doodo kharashyada oo aad u xirto akoonnada; inuu kaa caawiya inaad xayirto faylkaaga deynta ee saddexda xafiis ee deynta ee ugu waaweyn; iyo inuu kaa caawiya inaad la xiriirto hay'adaha dowladda si ay kaaga caawiyaan inaad aqoonsigaaga ku soo celiso xaaladdiisii saxda ahayd).

Fadlan ogow in adeegga soo-celinta aqoonsiga (Identity Restoration) uu kuu diyaar yahay muddo **24 bilood ah**, laga bilaabo taariikhda warqaddan, mana u baahna wax tallaabo ah oo dhankaaga laga rabo xilligan. Shuruudaha iyo Xeerarka dalabkan waxay ku yaallaan www.ExperianIDWorks.com/restoration. Waxaad sidoo kale boggan ka heli doontaa talooyin loogu talagalay iskaa isku caawinta iyo macluumaad ku saabsan ilaalinta aqoonsiga.

Macluumaad ku saabsan Hagaha Ilaalinta Xatooyada Aqoonsiga

Macluumaadka xiriirka ee saddexda shirkadood ee heerka qaran ee bixiya warbixinnada deynta ayaa ah sida soo socota:

Equifax	Experian	TransUnion
Taleefanka: 1-800-685-1111	Taleefanka: 1-888-397-3742	Taleefanka: 1-833-799-5355
Sanduuqa Boostada (P.O. Box) 740256	Sanduuqa Boostada (P.O. Box) 9554	Sanduuqa Boostada (P.O. Box) 2000
Atlanta, Georgia 30348	Allen, Texas 75013	Chester, PA 19016
www.equifax.com	www.experian.com	www.transunion.com

Adeegga Intixaanaadka Waxbarashada (Educational Testing Service, ETS)

Warbixinta Deynta oo Bilaash ah. Waxaan ku xasuusineynaa inaad ka feejignaato dhacdooyinka ku lug leh khiyaanada ama xatooyada aqoonsiga adigoo dib u eegaya bayaannada akoonkaaga iyo warbixinnada deynta ee bilaashka ah si aad u ogaato wixii ah fal aan la oggoleyn. Haddii aad wax ah lacag-bixinno/khidmado aan la oggolaan ku aragto bayaanada akoonkaaga maaliyadeed, waa inaad isla markiiba u sheegtaa hay'adda maaliyadeed ee aad macmiilka u tahay. Waxaad nuqulka warbixintaada deynta (credit report), oo bilaash ah, hal mar 12-kii biloodba ka heli kartaa mid kasta oo ka mid ah saddexda shirkadood ee heerka qaran ah ee bixiya warbixinnada deynta. Si aad u dalbato warbixintaada deynta (credit report) ee sannadlaha ah ee bilaashka ah, fadlan booqo www.annualcreditreport.com ama wac lambarka bilaashka lagu waco ee ah 1-877-322-8228. Waxaad sidoo kale dalban kartaa warbixintaada deynta (credit report) ee sannadlaha ah oo bilaash ah, adigoo boostada ku diraya Foomka Codsiga Warbixinta Deynta ee Sannadlaha ah oo aad buuxisay (kaas oo laga heli karo mareegta Guddiga Ganacsiga Federaalka ee Maraykanka ("FTC") www.consumer.ftc.gov) kuna hagayo: Adeegga Codsiga Warbixinta Deynta ee Sannadlaha ah (Annual Credit Report Request Service), P.O. Box 105281, Atlanta, GA 30348-5281.

Dadka degan Colorado, Georgia, Maine, Maryland, Massachusetts, New Jersey, Puerto Rico, iyo Vermont: Waxaad heli kartaa hal nuqul ama in ka badan (iyadoo ku xiran gobolka) oo ah nuqulada warbixintaada deynta oo dheeri ah, kuwaas oo bilaash ah. Waa inaad si toos ah ula xiriirtaa mid kasta oo ka mid ah hay'adaha warbixinta deynta si aad u hesho warbixin(no) dheeraad ah.

Xayirida Maaliyadeed. Xayirida maaliyadeed, oo sidoo kale loo yaqaan joojinta deynta, waxay xaddidaysaa marin u helidda faylkaaga deynta, taasoo adkeynaysa in tuugada aqoonsiga ay akoonno cusub ku furaan magacaaga. Si bilaash ah ayaad u xiri kartaa (u xayiri kartaa) una furi kartaa diiwaankaaga deynta. Waxaad sidoo kale si bilaash ah u xayiri kartaa akoonada carruurtaada da'doodu ka yar tahay 16 sano jir. Haddii aad tahay qof mas'uul ka ah qof kale, aad tahay ilaaliye ama aad haysato awood-wakiilasho (power of attorney) sharci ah, waxaad sidoo kale qofkaas u samayn kartaa xayiraada maaliyadeed oo bilaash ah.

Sidee bay u shaqeyn doonaan xayiraadahan? La xiriir saddexda hay'adood ee heerka qaran ah ee warbixinta deynta – Equifax, Experian, iyo TransUnion. Haddii aad codsato xayiraad adigoo isticmaalaya internetka ama taleefanka, hay'addu waa inay xayiraaddaas ku dhaqangelisaa gudaha hal maalin oo ah maalmaha shaqada. Haddii aad codsato in xayiraadda la qaado, hay'addu waa inay xayiraadda ku qaaddaa muddo saacad gudaheed ah. Haddii aad codsigaaga ku soo dirto boostada, hay'addu waa inay dhaqangelisaa xayiraadda ama ay qaadaa xayiraadda gudaha muddo ah saddex maalmood oo ah maalmaha shaqada, laga bilaabo marka ay hesho codsigaaga. Sidoo kale, waxaad si ku-meel-gaar ah u qaadi kartaa xayiraadda iyada oo aan wax lacag ah lagaa qaadin.

Macluumaadka soo socda waa in lagu daraa marka la codsanayo xayiraadda maaliyadeed (ogsonow haddii aad xaaskaaga/saygaaga u codsanayso warbixin deyn, macluumaadkan waa in sidoo kale loo bixiyaa isaga/iyada): (1) magaca oo dhammaystiran, oo leh xarafka hore ee magaca dhexe; (2) Lambarka Soshiyaal Sekiyuuritiga; (3) taariikhda dhalashada; (4) cinwaanka gur ee haddeer iyo cinwaan kasta oo hore u soo jiray shantii sano ee la soo dhaafay; iyo (5) wixii ah warbixin ee ku saabsan dhacdo ama cabasho ee haboon ee loo gudbiyay hay'ad sharci fulin ama Diiwaanka Baabuurta. Codsiga waa inuu sidoo kale la socdaa nuqulka dukumeenti aqoonsi oo ay bixisay dowladda, iyo nuqulka biilka adeegyada asaasiga ah (sida korontada ama biyaha) oo dhawaan la soo saaray, ama bayaan ka socda bangi ama mid caymis.

Adeegga Imtixaanaadka Waxbarashada (Educational Testing Service, ETS)

Waa lagama maarmaan in nuqul kastaa uu ahaado mid si cad loo akhrin karo, isla markaana ay ku qoran yihiin magacaaga, cinwaankaaga boostada ee haddeer, iyo taariikhda la bixiyay.

Dadka degan Colorado iyo Illinois: Waxaad wakaaldaha warbixinta deynta iyo FTC ka heli kartaa macluumaad ku saabsan xayiraadaha maaliyadada (security freezes).

Dadka deggan New Mexico: Waxaad xayiraada maaliyada ku sameyn kartaa warbixintaada deynta, si aad u ilaaliso asturnaantaada una xaqiijiso in aan deyn lagu bixin magacaaga adiga oo aan ogeyn. Waxaad gudbin kartaa bayaanka ka saarista si macluumaad looga saaro warbixintaada deynta haddii lagu geystay xatooyo aqoonsi. Waxaad xaq u leedahay inaad warbixintaada deynta ku soo rogti xayiraad maaliyadeed ama inaad soo gudbis bayaanka ka saarista adigoo raacayo Xeerka Warbixinta Deynta Caddaaladda ah iyo Amniga Aqoonsiga. Si aad u hesho macluumaad dheeri ah, oo uu ku jira macluumaad ku saabsan xuquuqo dheeraad ah, booqo www.consumerfinance.gov/learnmore ama qoraal u dir: Xafiiska Ilaalinta Maaliyadda Macaamiisha (Consumer Financial Protection Bureau), 1700 G Street N.W., Washington, DC 20552.

Digniinnada Khiyaanada. Digniinta khiyaanada waxay ganacsiyada eega xogtaada deynta ku wargelinaysaa inay kula xiriiraan ka hor inta aysan furin akoon cusub. Digniinta koowaad ee ku saabsan khiyaanada waxay warbixintaada deynta ku sii jirtaa muddo hal sano ah. Haddii aad hore lagu geystay xatooyo aqoonsi oo aad haysato caddaymo dukumeenti ah oo habboon, waxaa warbixintaada deynta lagu soo dari karaa digniin muddo dheer soconaysa. Digniinta khiyaanada ee soconeyso muddada dheer ayaa sii saarnaaneyso warbixintaada deynta muddo toddobo sano ah. Si aad digniin khiyaano ugu darto warbixinnadaa deynta, la xiriir mid ka mid ah xafiisyada qaran ee diiwaangeliya xogta deynta. Digniinta khiyaanada waa bilaash. Xafiiska xogta deynta ee aad la xiriirto waa inuu wargeliyaa labada kale, saddexdooduna waxay digniin ku dari doonaan nuqullada warbixintaada ee ay hayaan.

Dadka degan Colorado iyo Illinois: Waxaad wakaaldaha warbixinta deynta iyo FTC ka heli kartaa macluumaad dheeri ah oo ku saabsan digniinada khiyaanada.

Guddiga Ganacsiga Federaalka iyo Xafiisyada Xeer-ilaaliyayaasha Guud ee Gobollada. Haddii aad aaminsan tahay in lagu geystay xatooyo aqoonsi (identity theft), ama ay jirta sabab aad ku rumeysan tahay in xogtaada shakhsiyeed si khaldan loo isticmaalay, waa inaad isla markiiba la xiriirtaa Guddiga Ganacsiga Federaalka (Federal Trade Commission) iyo/ama xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee gobolka aad deggan tahay. Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa wakaaladahan si aad u hesho macluumaad ku saabsan sida looga hortago ama looga fogaado xatooyada aqoonsiga. Waxaad la xiriiri kartaa Guddiga Ganacsiga Federaalka (Federal Trade Commission), Xarunta Jawaab-celinta Macaamiisha (Consumer Response Center), 600 Pennsylvania Avenue, NW, Washington, DC 20580, www.ftc.gov/bcp/edu/microsites/idtheft/, 1-877-IDTHEFT (438-4338).

Dadka degan Connecticut: Waxaad la xiriiri kartaa oo aad macluumaad ka heli kartaa Xeer-ilaaliyaha Guud ee gobolkaaga adigoo u maraya: Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Connecticut, 55 Elm Street, Hartford, CT 06106, 1-860-808- 5318, www.ct.gov/ag

Dadka degan Degmada Columbia: Waxaad la xiriiri kartaa Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Degmada Columbia (Office of the Attorney General for the District of Columbia), oo ku yaalla 441 4th Street NW, Suite 1100 South, Washington, D.C. 20001, <https://oag.dc.gov>, 202-442-9828.

Adeegga Imtixaanaadka Waxbarashada (Educational Testing Service, ETS)

Dadka degan Maryland:Waxaad la xiriiri kartaa Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Maryland, Qaybta Ilaalinta Macaamiisha, 200 St. Paul Place, Baltimore, MD 21202, <https://www.marylandattorneygeneral.gov>, 1-888-743-0023.

Dadka degan New York:Waxaad la xiriiri kartaa Waaxda Ilaalinta Macaamiisha ee Dawladda Gobolka New York oo ku taal One Commerce Plaza, 99 Washington Ave., Albany, NY 12231-0001, 518-474-8583 / 1-800-697-1220, <http://www.dos.ny.gov/consumerprotection>; iyo waxaad la xiriiri kartaa Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Gobolka New York oo ku yaal, The Capitol, Albany, NY 12224-0341, 1-800-771-7755, <https://ag.ny.gov>.

Dadka degan North Carolina:Waxaad la xiriiri kartaa Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee North Carolina, Qaybta Ilaalinta Macaamiisha, 9001 Mail Service Center, Raleigh, NC 27699- 9001, www.ncdoj.gov, 1-877-566-7226.

Dadka degan Rhode Island:Waxaad la xiriiri kartaa Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Rhode Island ee ku yaal, 150 South Main Street, Providence, RI 02903, <http://www.riag.ri.gov>, 401-274-4400.

Dadka degan Texas:Waxaad la xiriiri kartaa oo aad macluumaad ka heli kartaa Xeer-ilaaliyaha Guud ee gobolkaaga adigoo u maraya: Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Texas www.texasattorneygeneral.gov/consumer-protection/identity-theft ama la xiriir Khadka Tooska ah ee arrimaha Xatooyada Aqoonsiga adigoo adeegsanayo lambarka 800-621-0508 (wicitaanku waa bilaash).

Ka warbixinta xatooyada aqoonsiga iyo helitaanka warbixin boolis.Waxaad xaq u leedahay inaad hesho wixii ah warbixin booliis oo laga qoray gudaha Mareykanka ee ku saabsan dhacdadan. Haddii aad tahay dhibane loo geystay khiyaano ama xatooyo aqoonsi, waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad warbixin u gudbisoo booliiska.

Dadka degan Iowa:Waxaa lagugula talinayaa inaad u sheegto hay'adaha sharci-fulinta ama Xeer-ilaaliyaha Guud ee Iowa wixii kaad uga shakisan tahay inay yihiin xatooyo aqoonsi.

Dadka degan Massachusetts:Waxaad xaq u leedahay inaad warbixin u gudbisoo booliiska haddii aad tahay dhibane loo geystay xatooyo aqoonsi. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad booliiska u gudbisoo warbixin, isla markaana aad hesho nuqulka warbixintaas.

Dadka degan Oregon:Waxaa lagugula talinayaa inaad u sheegto hay'adaha sharci-fulinta, Guddiga Ganacsiga Federaalka (Federal Trade Commission), iyo Xeer-ilaaliyaha Guud ee Oregon, wixii aad uga shakisan tahay inay yihiin xatooyo aqoonsi.

Dadka degan Rhode Island:Waxaad xaq u leedahay inaad gudbisoo ama hesho warbixin boolis oo ku saabsan dhacdadan. [#] Dadka deegan Rhode Island ayay saameysay dhacdadan.